

## 6 Shay oo ay tahay Inaad Ka Ogaato Ku Fiicnaanshaha Luuqadda Ingiriisiga

### Waa maxay ku fiicnaanshaha luuqadda Ingiriisigu (ELP)?

Maine waxa ay ku qeexdaa ku fiicnaanshaha luuqadda Ingiriisiga (ELP) xirfad ku filan oo uu u leeyahay Ingiriisiga si uu galaangal ugu yeesho manhajka. Muujiyahan guusha dugsigu waxa uu diiradda saarayaa bartayaasha Ingiriisiga waxa uuna qiyaasayaa horumarka ay ka sameeyeen ku fiicnaanshaha luuqadda Ingiriisiga sannad kasta.

### Waa kuma bartayaasha Ingiriisigu?

Bartayaasha Ingiriisigu waa arday kuwaasi oo haysta luuqad aasaasi ah ama luuqadda guriga oo aan ahayn luuqadda Ingiriisiga kuna jira habkii barashada Ingiriisiga. Ku dhawaad 3% kamid ah ardayda Maine waa bartayaal Ingiriisiga ah dugsiyadooduna waxa ay ka taageeraan barashada Ingiriisiga si ay u guulaystaan aqoon ahaan.

### Halkay xogtu ka timiday?

Bartayaasha Ingiriisiga waxa maamula ACCESS ee ELLS, waa qiimayn taasi oo qiyaasta awooda ardayga ee dhagaysiga, hadalka, akhrinta, iyo qoraalka Ingiriisiga.

### Waa maxay ujeedada guusha ee Maine ELP?

Dhibcaha guud ee Ardayga ee ACCESS ELLs waxa uu u dhaxeeyaa laga bilaabo 1.0-6.0. Maine, ku fiicnaanshaha Luuqadda Ingiriisiga heerka 4.5, sidaa daraadeed horumarka muujiyaha ku fiicnaanshaha luuqadda Ingiriisigu waxa uu qiyaasaa horumarka ardaygu uu samaynayo sannad kasta ee ku waajahan gaadhida heerka 4.5. Celceliska horumarka ee ku waajahan ee ujeedada sannadlaha ee u dhaxaysa 80% iyo 95%.

### Maxay Maine u samaynaysaa ELP?

Xeerka federaalka ee Guusha Arday Kasta (ESSA) waxa uu uga baahan yahay gobol kastaa inuu leeyahay hab isla xisaabtan kaasi oo ka dhigaya ku fiicnaanshaha Luuqadda Ingiriisiga muujiyaha horumarka iyo guusha ardayga.

### Sidee ayuu u eegi doonaa kaadhka warbixinta ee dugsiga?

Dugsiyada kuwaasi oo haysta toban ama ka badan oo arday kuwaasi oo ah bartayaasha luuqadda Ingiriisiga waxa ay heli doonaan horumar ah qiyaasaha ELP ee Kaadhka Warbixinta, kaasi oo muujin doona horumarka isku celceliska sannadlaha ah ee dhammaan bartayaasha Luuqadda Ingiriisiga ee dugsighu ay sameeyeen.